Su'aalo iyo Jawaabo ku saabsan Korono Faayrus (COVID-19)

Taariikhdii la qoray 3/11/20

Markaan eegno waxaan ka maqalnay dalalka uu saameysey, faayruska COVID-19 waxa uu sababi karaa xanuun noqonaya mid sahlan iyo mid daran oo ku dhaca neefmareenka balse carruurtu waxay u muuqdaan in ay aad u yar tahay in uu xanuunku ku dhaco. Faayrusku wuxuu u muuqdaa in uu ku faafayo xiriirka dadka qof-ilaa-qof oo masuuliyiinta caafimaadka waxay filayaan kiisas badan in lagu arki karo Mareykanka.

Hoos ka akhriso macluumaad si joogto ah loo cusbooneysiiyo: **Talooyinka Guud ee Caafimaadka, Xiritaanka Dugsiga, Nadaafadda/Ka-hortagga, Shaqaalaha MPS, Shaqaalaha/Ardeyda iyo Safarka Dibadda**

Talooyinka Caafimaadka Guud

S: Sidee baan ku ogaanayaa marka ay ilmahaygu iskuulka ka joogayaan?

A: Waaxda caafimaadka ee degmada Hennepin ayaa dadka kula talin doonta markay jirto cabsi xanuun daran si ay uga baaqdaan iskuulka ama shaqada.

Haddii ay ardaydu isku arkaan xummad gaareysa 100 ama ka sarreysa, qufac, iyo/ama neefsashada oo ku adkaata, waa in ay guriga joogaan oo ay isla markiiba la xiriiraan dhakhtarkooda. Waxa kale oo talooyin dheeraad ah laga heli karaa halkan.

Haddii arday jooga iskuula lagu arko calaamdo, waxaa loo gudbin doonaa xafiiska caafimaadka si loo caawiyo.

Waxaan ognahay astaamaha ay jirradu ardeyda ku keeni karto in ay yihiin welwel iyo cabsi balse annaguna waxaan ku dedaaleynaa wixii tabasho ah sidii aan wax uga qaban lahayn. Waxaa naga go'an hubinta in ardeyda lagu taageero kalgacal, naxariis, iyo daryeel.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka-joogidda iskuulka, fadlan la xiriir dhakhtar ama shaqaalaha caafimaadka.

S: Ma kala sheegi karo haddii ilmahaygu qabo hargab xun, kuduudiye ama fuluu, ama COVID-19. Muddo intee le'eg ayaan guriga ku haynayaa?

A: Guriga ha kuu joogaan oo iskuul yeysan imaan ilmahaagu ilaa iyo 24 saacadood ka dib markay qandhadu ka ba'do (ADIGOON siin daawo xummadda ka yareysa) markaas oo

caafimaadkoodu caadi ku soo noqdo oo ay ka qeyb qaadan karaan ciyaarta. Wixii su'aalo ah weydii shaqaalaha daryeelka caafimaad ee shatiga haysta. Waxa kale oo talooyin dheeraad ah laga heli karaa halkan.

S: Maqnaashaha ardeyda ma wuxuu noqonayaa mid cudurdaar leh?

A: Haddii ay qoys taleefan noogu soo sheegaan in ay cabsi qabaan oo aysan ilmahooda u soo dirayn iskuulka ama haddii ardeydu xanuusan yihiin, sida maqnaanshaha caadiga ah ayaa loo adeegsan doonaa, sida ku xusan Xeerka Guddiga 5100A.

Haddii ay qoys taleefan noogu soo sheegaan in uu arday u baahan yahay in la karantiilo, shaqaalaha iskuulka ayaa la xiriiri doona Adeegyada Caafimaadka Degmada oo u sheegi doona qoysaska waxa ay sameyn doonaan.

Haddii iskuulka loo xiro sabab la xiriirta COVID-19 oo faafay awgiis, maqnaanshaha ardeyda oo dhan cudurdaar ayey leeyihiin. Shaqaalaha loo arko in ay muhiim yihiin, shaqadooda ayey imaan doonaan balse waxaa la siin doonaa talooyin dheeraad ah.

S: Maxaa dhacaya haddii uu jiro macallin welwel ka qaba caafimaadka arday fasal ku dhex jira?

Haddii ilmo lagu arko calaamadaha COVID-19, waxaa loo maareyn doonaa sida xanuun caadi ah; Ilmuhu wuxuu si toos ah u tagi doonaa xafiiska caafimaadka ee iskuulka si loo qiimeeyo oo waalidkana waa lala xiriirayaa marka loo baahdo. Kalkaaliyaha caafimaadka ee iskuulka ayaa sameyn doonta wixii warbixin dheeraad ah marka loo baahdo.

Xiritaanka Iskuulka

S: Sidee MPS go'aan uga gaari doontaa marka uu iskuul u baahan yahay in la xiro -- oo muddo intee la'eg ayaa la xiri doonaa?

A: Adeegyada Caafimaadka MPS waxay si dhow ula shaqeynayaan, weliba maalin kasta, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota si loo go'aamiyo talooyinka xiritaanka, haddii ay dhacdo, laakiin waa wax ku xirnaan doona hadba xaaladda lagu jiro. Intaas waxaa sii dheer, MPS waxay si joogto ah u kormeerayaan xaaladaha dhisme kasta si ay u go'aamiyaan haddii ay muhiim yihiin go'aammada xiritaanka.

Fadlan xusuusnowqoys kasta oo ay baahidooda aasaasiga ah ku tiirsan tahay iskuullada iyo shaqaalaha, sida cuntada caadiga ah, daryeelka caafimaadka, iyo xannaannada carruurta ee iskuulka ka dib. Haddii la xiro iskuullada, qoysaska nugul ama nagu tiirsan waxay halis ugu jiraan in ay arrintaasi si xun u saameyso. Xiritaanka iskuullada waa waxa ugu dambeeya oo aad u adag, oo lagu fulinayo daahfurnaan, iyo iskaashiga Caafimaadka Dadweynaha.

Hadafka 'MPS' waa in la joogteeyo oo uusan is-beddelin jadwalka ardeyda mar kasta oo ay macquul tahay. Dadweynaha oo dhan waa la soo ogeysiin doonaa isla marka la ogaado in ay jiraan waxyaabo walaac ah.

Nadaafadda/Ka-Hortagidda

S: Sidee bay MPS u hubisaa nadaafadda meel kasta ee dhismeyaasha?

A: Arrintan waa masuuliyad aan wadaagno oo ka dhaxaysa shaqaalaha MPS, ardeyda iyo qoysaska. Waaxda Hawlaha Dhirta ayaa si dhow ula shaqeyneysa shaqaalaha gacanta ku haya hawshan si ay u hubiyaan in la fuliyey habraaca shuruudaha nadaafadda iyadoo fiiro gaar ah loo sii yeelanayo meelaha dadkoo dhan ka dhaxeeya ee iskuulka, sida meelaha nalalka laga shido, sida loo furo albaabbada iyo meelaha la midka ah. Waxaan sidoo kale ku kordhineynaa in ay shaqaale dheeraad ah hubiyaan nadaafadda iyo baabbi'inta jeermiska.

Waxaan ka codsaneynaa in ay shaqaalaha iyo qoysasku isticmaalaan kiimikooyinka ay MPS oggoshay oo keliya si ay wax ugu nadiifiyaan uguna baabbi'inta jeermisyada iyo si loo hubsado in kiimikooyinku aysan dhib u keeneyn badqabidda carruurta oo dhan.

Qoysasku waa in ay hubiyaan in carruurtu fahmaan sida fududn ee ay u joojin karaan faafidda jeermiska faayruska ah sida ku qoran halkan, iyadoo la tusayo waxa ay tahay in guriga lagu sameeyo. Markan weliba waa wakhtigii sannadka oo dhan ay fasallada ku yaraadaan sahayda waraaqaha sanka lagu masaxdo iyo alaabta kale, sidaas awgeed macallinka ilmahaaga weydii in waalidku waraaqo keenin karaan.

S: Basaska ma si joogto ah ayaa loo nadiifinayaa?

A: Haa, wadeyaasha basaska si joogto ah ayey u masaxayaan basaska mar kasta oo ay soo galaan oo waxaa la siin doonaa waxa ay ku nadiifiyaan si ay in badan u tirtiraan meelaha la taabto ee basaka. Waxaan eegaynaa sida badanaa basaska oo dhan - kuwa MPS iyo kuwa kale ee aan shirkado kale ka soo kireysanno - si ay u sameeyaan nadaafad dheeraad ah iyo waxyaabaha ay ku buufin doonaan gudaha basaska oo dhan. Wakhtiga ayaa dhib nagu keenaya sababtoo ah waa in wax kasta la qallajiyo.

S: Sidee baa iskuulka loo nadiifin karaa haddii mid ka mid ah ardeyda laga helo xanuunkii COVID-19 iskuulka oo xiran?

A: Macluumaad cusub oo ku saabsan faayruskan - oo ah faayrus nagu cusub - ayaa soo baxaya maalin kasta. Iskuullada Mareykanka ee ilaa hadda la xiray go'aanku waa labo isbuuc si loo hubiyo in aysan shaqaalaha iyo ardeydu waxba isugu gudbin muddada xanuunka la is qaadsiin karo haddii uu iyaga ku dhacay. Waxa aan ka ognahay maanta waa in uusan faayruskan sii noolaan karin muddo ka badan laba toddobaad, in kasta oo warbixinnada noloshiisu ay kala duwan tahay oo ay tahay dhowr saac illaa dhowr maalmood marka uusan ku jirin jirka bani'aadamka.

S: Maxaa la sameynayaa si loo yareeyo fursadda jeermiska loogu gudbin karo hoolka ay ardeydu ku cunteyso?

A: Dugsiyadaa Dadweynaha ee Minneapolis waaya-aragnimo hore oo guul ahayd ayey ka haystaan sida wax loogu qabto shaqaalaha iyo ardeyda marka uu jiro xanuun faafaya. Qeyb ka mid ah habka aan u sameyno waa hab hawlgal gaar ah oo aan ku joojineyno faafinta wixii jeermis ah, oo waxaa ka mid ah sida inaan beddelno maacuunta cuntada mar kasta oo galaas cunteeyo iyo nadiifin joogto ah inaan ku sameyno miisaska iyo kuraasta.

Haddii loo baahdo tallaabooyin adag oo dheeraad ah, MPS waxay soo saareysaa shurduudo cunto oo cusub iyo hab ah ardey kasta inuu isu adeego. Waxaan raaci doonnaa talooyinka maamulka magaalada, gobolka iyo dowladda dhexe marka ay tahay inaan raacno tallaabooyin dheeraad ah.

S: Ka warran marka ay ardeyda/qoysasku u safraan dibadda iyadoo aysan MPS waxba ka ogeyn? Goorma ayaan dadka kula talineynaa joogidda guriga? Sidee loo ogaanayaa marka shaqaaluhu safraan iyo calaamadahooda?

A: Dugsiyada Dadweynaha ee Minniapolis ma bixiyaan talooyin ah marka ay ardeyda iyo shaqaalaha u baahan yihiin in ay is karantiilaan. Talooyinkaas waxay ka yimidaan shaqaalaha garoonka diyaaradaha iyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota oo iyagaa ka soo saara sharciyo gaar ah Dalalka u qoran ee Heerka Digniinta 3-aad iyo dadka ka imaanaya. Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxay si xushmad leh uga codsanayaan qoysaska iyo shaqaalaha in ay raacaan talooyinkaas si ay ugu dedaalaan caafimaadka dadka kale ee iskuulka jooga oo dhan. Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxay si dhow ula soconayaan safarrada ay u baxaan shaqaalaha iyo ardeyda marka ay Maamulka Degmada safarka u diraan.

S: Maxay MPS ugu khasbi weyday dhammaan shaqaalaha iyo ardeydu in ay xirtaan maasgaro?

A: Waaxda Caafimaadka Minnesota kuma talineyso in ay dad caafimaad qaba xirtaan maasgaro ay isaga difaacaan xanuunnada neefmareenka, sida xanuunka cusub ee COVID-19. Maasgaro waxaa isticmaalaya dadka lagu arko calaamdaha xanuunka COVID-19 si looga hortago in uu xanuun ku dhex faafo dadka kale. Isticmaalidda maasgarada waxay muhiim u tahay shaqaalaha caafimaadka iyo dadka caawiya qof xanuunsan (oo u jooga guriga ama xarumaha dadka waaweyn).

Shaqaalaha MPS

S Maxay sameynayaan shaqaalaha MPS haddii ay dareemaan caafimaad-xumo?

A: Sharciga xanuunka ee caadiga ah ayey raacayaan xubnaha shaqaalaha ah oo dhan. Haddii ay shaqaaluhu isku arkaan xummad gaareysa 100 ama ka sarreysa, qufac, iyo/ama neefsashada oo ku adkaata, waa in ay guriga joogaan oo ay isla markiiba la xiriiraan dhakhtarkooda.

S: Ka warran haddii la waayo wadeyaal basas oo ku filan MPS oo dhan? Sidee bay carruurtu iskuulka u aadi doonaan?

A: Maalin kasta, MPS waxay wadeyaal u diyaarisaa ilaa 20 bas haddii ay maqnaadaan wadayaashii ku qornaa. Sidaas oo kale ayaa loo diyaarinayaa wadeyaal dheeraad ah haddii/marka wadayaasha caadiga ah xanuunsadaan. Haddiise ay dhacdo inaan weyno wadeyaal, qoysaska ayaan ogeysiin doonnaa in aan wade loo hayn baskii iskuula ee ilmahooda.

Waxaan u sheegeynaa dhammaan qoysasku in ay maalin kasta eegaan barnaamijka Here Comes the Bus, si ay ula socdaan baska ilmahooda.

Haddii xaalku gaaro heer aan ardeyda u weyno gaadiidkii basaska ee qaadi lahaa, waxay u badan tahay in aan ku jirno xaalad daran oo ah in xanuun ku dhex faafay shaqaalaha iyo ardeyda oo waa inaan soo saarno shuruudo cusub oo wax looga qabanayo.

S: Sidee bay iskuulladu kula socdaan kuna soo sheegayaan maqnaanshaha shaqaalaha?

A: Wakhtigan shaqaaluhu waxay maqnaanshahooda u soo sheegayaan sida caadiga ah ee hadda. MPS waxay weydiin doontaa hoggaamiyeyaasha iskuulka in ay la socdaan shaqaalaha iyo maqnaanshaha ardeyda**:**

- Si ay u xaqiijiyaan inaysan iskuulladu tabin taageerada ay u baahan yihiin
- Si ay ula socdaan oo uga soo warbixiyaan shaqaalaha iyo ardeyda waxyaabaha ku keenaya maqnaanshaha

S: Miyey jiraan macallimiin gaarsiis ah haddii ay kuwa hadda intooda badan xanuunsadaan?

A: Sida wadeyaashaa basaska, dhowrkii sano ee la soo dhaafay MPS waxaa ku yaraa macallimiinta gaarsiiska ah. Waxaan ku dedaalnaa sidii aan u dabooli lahayn baahida fasal kasta haddii/marka ay macallimiin naga xanuunsadaan ama markay nagu yaraadaan shaqaalaha gaarsiiska ah. Haddii aan awoodi weyno inaan daboolno baahida ardeyda, qoysaska ayaan ugu soo sheegeynaa sida ugu dhakhso badan. Waxaan u sheegeynaa qoysaska in ayku tala galaan qorshe ah xannaanno marka si ku meel gaar ah iskuulka loo xiro ama marka ay xanuunsadaan waalidka, carruurta, ama shaqaalaha xannaannada. Linkigan ka eego faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ka ka-hortagidda iyo diyaargarowga.

Shaqaalaha iyo Ardeyda u Baxda Safarrada Dibadda

S: Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha MPS uu u safro dalka dibaddiisa, gaar ahaan dalalka laga soo sheegay kiisaska COVID-19, maamulka iskuulladu ma waxay ka rabaan in uu qofkaas is karantiilo ka hor intuusan iskuulka ku soo noqon?

J: CDC waxay soo jeedisay in dadka safarka ah ee ka soo laabta dalal badan oo uu xanuunku ku faafay (Dalalka Heerka 3-aad ee Ogeysiiska Caafimaadka Safarka) waa in ay joogaan guriga muddo 14 maalmood ah oo ka bilaabaneysa maalinta ay ka soo tageen dalalkaas.

- Dalalka hadda la ogyahay xaaladdooda iyo talooyin dheeraad ah ka eego CDC: Socotada ka timid Dalalka uu ku Faafay Xanuun (Hadda Socda) iyo Imaatinkooda Mareykanka
- Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto, fadlan kala xiriir MDH taleefanka 651-201-5414.

S: Haddii ay qoys ka tirsan MPS u safraan dibadda, gaar ahaan dalalka laga soo sheegay kiisaska faafaya ee COVID-19, miyey imaan karaan iskuulka marka ay soo guryo-noqdaan ama ma waxay u baahan yihiin in laga baaro faayruska?

J: CDC waxay soo jeedisay in dadka safarka ah ee ka soo laabta dalal badan oo uu xanuunku ku faafay (Dalalka Heerka 3-aad ee Ogeysiiska Caafimaadka Safarka) waa in ay joogaan guriga muddo 14 maalmood ah oo ka bilaabaneysa maalinta ay ka soo tageen dalalkaas.

- Dalalka hadda la ogyahay xaaladdooda iyo talooyin dheeraad ah ka eego CDC: Socotada ka timid Dalalka uu ku Faafay Xanuun (Hadda Socda) iyo Imaatinkooda Mareykanka
- Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto, fadlan kala xiriir MDH taleefanka 651-201-5414.

S: Sidee bay MPS ula dhaqmi doontaa ardeyda cusub ee ka imaaneysa dalalka laga soo sheegay faayruska?

A: Masuuliyadda Dugsiyada Dadweynaha ee Minneapolis dugsi iyo barnaamij kasta waa in dhammaan ardeyda iyo qoysaska lagu soo dhaweeyo dugsiyada. Sababtuna waa in dadka ka imaanaya safarrada caalamiga ah ay soo baaraan shaqaalaha garoonka diyaaradaha ama MDH, **qofna lagama filayo oo kuma fekeri karo baarista qoysaska iyo ardeyda**si kasta iyo meel kasta oo ay u safraan, iyo suurtagalka in xanuun la is qaadsiiyo ama walaaca caafimaadka ee la xiriira COVID-19.